Dave the Brave

Read the story about a brave little boy and answer the questions below:

On New Year Eve, young Dave was sitting near his window with a heavy heart. He wanted to go outside and make a snowman. But his mother did not let him. She said, "It's snowing heavily. It won't be safe. Why don't you play with your stuffed panda instead?" Dave told his mother that even his panda, Mr. Fresh, wanted to go outside. "Plus, I am a big boy now," Dave tried to plead but she still didn't agree. Looking out of his window, Dave saw his neighbor Mrs. Sharpton walking on the slippery street with lots of bags and parcels. He knew she needed help. He wanted to go outside and help her but his mother had asked him not to go out. So, he carefully opened the window and shouted, "Look out, Mrs. Sharpton, there is ice next to your stairs." Mrs. Sharpton looked and saw there indeed was a lot of ice near her stairs. If Dave had not warned her, she would have slipped and hurt herself. Pleased, she called back, "Thank you, Dave the Brave." This cheered Dave up and he happily started playing with Mr. Fresh in his room.

Que	et orus
1)	Why did Dave's mother not let him go outside?
Arus	
_	

Dheefkii Geesiga Ahaa.

Akhri Sheekada Wiilka yare e geesiga ah oo ka jawaab su'aalaha huus ku qoran

Habeenkii uu soo galayay Sanadka cusub, Dheefkii da'da yaraa wuxuu wadno buuxa ku fadhiyay daaqada agteeda. Wuxuu rabay in uu dibada ubaxo oo uu sameeyo Ninbaraf ah. Laakiin Hooyadii umayna ogolaan.Waxay ku tiri, "Barafku aad ayuu u da'ayaa. Mana noqon doonto mid aamin ah. Maxaad ugu ciyaari la'dahay Baandhahaaga wayn badalkeeda". Dheef wuxuu hooyadii u sheegay in xataa Baandhihiisa Mr. Fireesh uu rabo in uu dibada uboxo. "Waxaa intaa dheer hada waxaan ahay wiil wayn", ayuu Dheef ku cawday laakiin wali maynan ka aqbalin. Isagoo dibada daaqada ka eegaya ayuu Dheef arkay Mr.Sharpton oo socota wadada lagu simbiririxaysto gacmahana ku wadata boorsooyin badan iyo kartoono. Wuxuu ogaa in ay u baahantahay caawimo. Wuxuu rabay in uu dibada uboxo iyadana caawiyo laakiin waxaa u diidday hooyadii in uu dibada u boxo. Hadaba, wuxuu aayar furay daaqadii kuna qaylyay, "Mr. Sharpton iska fiiri, Jaranjartaada agteeda waxaa jira baraf".Mr. Sharpton waxay eegtay oy aragtay in xaqiiqdii uu baraf badani u dhaw yahay jaranjarteeda. Hadii uuna Dheef u digin iyada, way simbiririxoonlahayd waxyeelona way soo gaadhi lahayd. Iyadoo faraxsan ayay u jawaabtay,"Aad ayaad u mahadsantahay Dheefkii geesiga ahaayoow". Dheefna farxad ayuu dareemay wuxuuna bilaabay in uu si farxadleh ugu ciyaaro Mr.Fresh qolkiisa dhaxdiisa.

Su'aalo:

1) Maxay Dheef hooyadii ugu diiday in uu dibada	u boxo?
	Jawaab	?
2)	Maxay la odhanjiray Baandhihiisa wayn?	
	Jawaab	?
3)	Ayaa socday wadada lagu simbiririxoodo?	
	Jawaab	?
4)	Muxuu Dheef Dibada ugu bixi waayay si uu u caa	wiyo jaarkiisa
	Jawaab	
5)	Maxay Mr. Sharpton ku tidhi Dheef?	
	Jawaab	?

?